**Amarka lamb. 18**

**Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka.**

## MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

## XOGHAYAHA GUUD

Kadib markii la arkay dekreetada Madaxweynaha ee lamb. 2357 ee 9 Disember 1952.

Kadib markii la arkay qodobka 8 ee maamulida Dalka Somaliya.

Kadib markii la arkay qod. 4 ee Mabaa'dida Dasturiga ah eek u xiran Heshiiska Maamulida.

Kadib markii la arkay dekreetada Madaxweynaha Dalka lamb 2357 ee 9 Disember 1952.

### WUXUU AMRAYAA

### Cutubka 1aad

### Qod. 1

Tirada La-taliyeyaashu waxaa lagu saleeyey tirada dadka deggan degmooyinka waxaan loo kala qeybiyey sida hoos ku qoran:

— Lix la-taliyeyaal degmo kasta ee tirada dadka deggan aysan ka badneyn ilaa 3 kun;
— Haddii tirada dadka deggan degmada ay ka badan yihiin 3kun waxay yeelan doonaan kun dadweyne hal la-taliye ilaa iyo iyo laga gaari doono tirada 10,000;
— Haddii dadweynaha deegaanku ka badan yahay 10,000, waxay yeelan doonaan 1 la-taliye 2,000 kun oo shicibka ilaa iyo intii laga gaari doono tirada 16,000;
— Haddii dadweynahu ka badan yihin 20,000 tiradu wuxuu noqon doona 20 la-taliyey;
— Guddonka la-taliyeyasha ee dowladaha hoose ee magalo madaxdu waxay noqon doonaan ugu yaraan 13 xubnood.

### Qod. 2

Guddonka Dowladaha hoose waxaa lagu dooran doona cod dhameeystiran oo xor ah oo qarsoodi ay codeyn doonaan rag keliya, kuwaaso laga soo dooran doono liiska mushaxaradyada ay u dhammeystiran yihiin tilmaamaha ku qoran qod. 7.

### Qod. 3

Tirada ku qoran qod. 1 waxaa lagu kordhin doona xubnaha metelayaa dadka laga tirada badan sida:

**Qowmiyadda Carabta**:

| | |
|---|---|
| Muqdisho | 3 |
| Magaaloyinka kale | 1 |

**Qowmidda Hindi/Bakistaani**

| | |
|---|---|
| Muqdisho | 2 |
| Kismaayo | 1 |
| Marka | 1 |

**Qowmidda Talyaaniga**

| | |
|---|---|
| Muqdisho | 4 |
| Marka | 1 |
| Brawe | 1 |
| Afgoye | 1 |
| Villabruzzi (Jowhar) | 1 |
| Kismayo | 1 |
| Margarita (Jamama) | 1 |

**Qod. 4**

Xubnaha metelaaya qowmiyada laga tira badan yahay waxaa soo magacaabi doono Maamulaha Guud ee Walaayada kadib markii uu ka helo liska jaaliyadda la metelaayo.

Talooyinka jaaliyada la metelayo waa in ay soo gaaran Xafiiska Arrimaha Gudaha oo la soo xiriireen Guddonka degmoyinka qaabilsan aagaasi, 60 beri gudahooda maalinta lagu soo faafiyey Faafinta Rasmiga ee dekreetada Maamulaha Guud sida u xusan qoran 11 ee amar-sharcigaan.

Affarta Wakiil ee jaaliyada Talyaaniga ee Muqdisho waxaa loo soo xuli doona sida soo socota:

3 qof magacyaadooda ee ka socda Rugta Ganacsigga ee qeybaha dhaqaalaha;

3 qof magacyadooda oo ay soo gudbiyeen ururadda shaqaalaha ee jira;

3 qof magacyadooda oo ay soo gudbiyeen ‘Guriga Talyaaniga’ si loo helo wakiil farsama yaqaanada, iyo shaqaalada xafiisyada;

Shaqaalaha Maamulka Walaayada Talyaaniga ee Somaliya iyo dowladaha hoose lama dooran karo.

**Cutubka 2aad**

Doorashada musharaxa

**Qod. 5**

Waxaa la dooran karan ciddi Somali ah oo ku qoran liiksa oo leh tilmaamahan:

— In ugu yaraan deggenay goobta dowladda hoose 1 sano;
— In 21 ay u buxsantay 31 Disember ee sanadkii la soo dhaafay;
— In uusan xabsi gelin ama dhimirkiisu uu nusqaamay;
— In uusan la dooran Karin xukun maxkamadeed awgeed.

Laguma qori karo liiska musharaxadka ciddii uu xukun maxkamadeed eek a badan 3 sano ay ku dhacday dembi ciqaab ah.

**Qod. 6**

Cod bixiyuhu wuxuu xaq u leeyahay hal cod oo uu ka dooran doono liiska musharaxadyaalka, kaas oo istilaab ku saari doono qalin meesha loogu tala ee liska.

Codku waa mid shaqsi ah mana la oggola in wakiilasho ama lagu soo diro codkaasi dhinaca boostada.

## Cutubka 3aad

Shuruudaha Cidda la Dooranayo

### Qod. 7

Waxaa loo dooran karan xubin la-taliye ee dowladda hoose, cid kasto oo Somali ah ee ku qoran liiska musharaxiinta dowladda hoose, iyadoo shardi ah in uu yaqaano qoriska iyo akhrista afka Talyaniga ama Carabiga, in uu jiro 25 sano uuna deggen yahay goobtaasi ugu yaraan 1 sano.

Si loo caddeyo aqoonta ciddi dooneyso in la doortay haddii uusan haysan shahado aqoontiisa, waxaa laga qaadi doona intixaan qorista iyo akhrista guddonka dowladda hoose.

### Qod. 8

Looma dooran karo la taliyeyaal dowladda hoose kuwa:

1) Ciddii xukun ciqaabeed uu ku dhacay ee la xiriira dembiyada ay ka mid yihiin dembiga xatooyo xoolo dadweyne, dembiyada nidaamka caamka, dil kas ah ama dhaawac culus, xoggidda , dhac iyo boobka, baada, tuuganimada, been abuurka, ribadda iyo qamri cabidda;

   Waxaa intaas ka baxsan kuwa la xukmiyo laakin dib celin xukun la siiyey;
2) Ciddi ku sugan xalaad caafimad dhimirka oo si joogta u xanuunsan;
3) Ciddi u shaqeysa dowladda hoose;
4) Militariga iyo militari u yaal.

### Qod. 9

Dad qaraaba isu dhow ah kama mid noqon karaan isla golaha degmada.

### Qod. 10

Xilka la taliye dowladda hoose waxay ka hor imaaneysa xilka lataliye dalka. Haddi qof ah la-taliyaha dalka loo dorto la taliye dowladda hoose, Garsooraha gobolka ayaa weydin doono in uu kala doorto labadaas xil.

Muddada kala doorashada labadaas xil waa in ay ku ekaata 5 beri laga bilaabo maalintii uu ka helay Garsooraha wargelinta in uu kala doorto.

Haddii mudadasi ay dhamaato isagoo uu musharaasi qoraal u soo gudbin Garsooraha waxaa loo qaadan doonaa in uu ka tana suulay xilka la taliye dalka, Sidas darted Garsooruhu wuxuu u gudbin doonaa Xafiiska Arrimaha Gudaha si loo saaro joojinta xilka la taliye dalka.

## Cutubka 4aad

Habka Qabanqaabinta Doorashooyinka

### Qod. 11

Maalinta doorashada waxaaa la suggay dalka gudahiisa oo idil, dekreeto ka soo baxday Maamulaha Guud ee lagu faafiyey Faafinta Rasmiga ugu yaraan 90 beri ka hor maalinta dorashada.

### Qod. 12

Liiska mushaaraxiinta la taliye dowladda hoose waa in la horgeeya Garsooraha gobolka qaabilsan muddo 40 bari ka hor maalintii ay dekreetada soo baxday sida lagu tilmaamay qodob sare ku xan.Liiskaasi waa in uu caadeeya magaca

iyo aabaha ciddi la dooranaya, taarikhda iyo goobta uu ku dhashay iyo haddii ay jiraan naysnaas.

**Qod. 13**

Liiska musharaxad waa in ay raali ka yihiin codbixiyeyaal ku qoran liiska dorashada ee dowoladda hoose, kuwaas oo aan ka yaaran Karin:

- 3 qof haddii dadka halkaasi ku nool ay dhan yihiin ilaa 500
- 5 qof haddii dadka halkaasi ku nool ay dhan yihiin 1,000
- 13 “ “ “ “ “ “ ‘ “ 5,000
- 20 “ “ “ “ “ “ “ “ 10,000
- 40 “ “ “ “ “ “ “ “ 25,000
- 60 “ “ “ “ “ “ “ “ 50,000
- 80 “ “ “ “ “ “ “ “ 100,000

Codbixiye kasta waa in uu ku qornaada hal liis oo keliya.

**Qod. 14**

Liiska musharaxiinta waa in ay la socdaan qoralladaani:

1) Caddeynta madaxa Maamulka dowladda hoose oo caddeynaya in uu da’da musharaxo ay tahay 25 sano, in uu deegan kiisu yahay goobtaasi hal sano;
2) Caddeynta madaxa Maamulka dowladda hoose in liiska musharax ay ku hoos saxiixan yiihin tiro codbixiyeeyaal ah oo isaga hortiisa ama ciddii meteleysa horteeda ay ku saxiixeen.

**Qod. 15**

Liis kasta lambarka musharaxiintu kama yaaran karo kala barka la taliyeeyaasha la dooran doono.

**Qod. 16**

Haddii ay tirada musharaxiinta iyo kuwa codbixiyeeyaalku ay noqdaan tiro isla eg, doorasho ma dhici karto.

Madaxa dowladda hoose wuxuu qorayaa warbixin oo uu gudbin doono Garsooraha gobolka kaas oo ku dhawaaqi doono in kadib markii uu la tashtay dowladaha hoose in la doortay ciddi isu soo sharaxday.

Haddii laakin tirda musharaxiinta ay ka yaartay tirada la taliyeyaasha la rabo, waxaa dekreeto ka soo baxda lagu mgacaabi doona la taliyeeyaasha iyadoo la raaci doono tilmaamaha qod. 7.

**Qod. 17**

Liis kast ee musharaxiinta waa in la saaro saxiix hubsiin ah.
Saxiixyada hubsiinta ah waa in horay loogu keydiyey iyadoo laba nuqul ah Garsoorka gobolka xafiiska , kaas oo sidaas ku wargelin doono Xafiiska Arrimaha Gudaha 30 beri gudahaooda maalintii uu Maamulaha Guud soo saray dekretada ku carifan qod. 11.

Xisbiyada ama kooxyada siyaasinta ah ee tartamaaya waa in hal saxiix hubin ee loogu tala galay dalka idil ay horgeeyaan Xafiiska Arrimaha Gudaha muddo 30 beri gudahooda laga bilaabo maalintii Maamulaha Guud uu soo saray dekreetada ku carifan qod. 11.

Haddii laba saxiix hubin ah ay jiraan waa yeelanaya qiimo oo loo horgeeyey Garsooraha ama Xafiiska Arrimaha Gudaha. Geysmada Xafiiska Arrimaha Gudaha

ayaa ka muhim sanaan karto midda Garsooraha iyadoo loo eegin taarikhda loo geeyey.

Muddo ila 55 beri laga bilaabo maalinti ay soo baxday dekreetada si ku xusan qod. 11, saxiixyada hubinta ah waa in la aqbala loona celiyaa Garsooraha ama Xafiiska Arrimaha Gudaha.

**Qod. 18**

Liiska musharaxiinga waa in la faafiyaa iyadoo oo uu xilsaaran yahay madaxa Maamulka dowladda hoose 60 beri gudahooda laga bilaabo maalintii dekreetad Maamulaha Guud la soo saray.

Shuruudaha aan soo sheegnay gudahooda, garsooraha gobolku waa inuu hormariyaa liisaska musharixiinta la soo bandhigay oo la ogaaday inay xeerka waafaqsan yihiin.

Faafintu waxay noqon doonta in lagu soo bandhigo keyda guud, ama  lagu soo dhejiyo goobaha dadweynuhu tago ama in la isticmaalo wixii kale ee aalad ah oo lagu gaarsiin karo bulshada dhexdeeda .

**Cutubka  5aad**

Keydka doorashooyinka

**Qod. 19**

Madaxa dowladda hoose wuxuu habeen doonaa buugga keyda dadka codbixiyeyaalka ee degmada oo laba nuqul ah si raacsan qaabka uu soo dejiyey Xafiiska Arrimaha Gudaha madaxa dowladda hoose wuxuu u xilsaaran yahay kormeeridda iyo habeynta joogtada ah ee buugga keyda codbixiyeyaalka.

Nuqul ka mid ah bugga keyda codbixiyeyaalka waa loo soo diray Garsooraha gobolka 31 Disember ee sanad kasto.

Bugga keydinta codbixiyeyaalka waa in la dhigaa xafiiska dowladda hoose 31 Disember waana la faafiyaa si caam iyadoo la raaci doono tilmaamaha ku qoran qodobka sara ku xusan.

**Qod. 20**

Waxaa iska leh xil in la baaro qab samida bugga keydinta codbixiyeyaalka ku qoran halkaasi.

Ciddi daneyneysa in magacooda lagu qoro amase ciddii la hilmaamay in lagu qoro bugga codbixiyeeyaalka, waxay codsi arrintaasi khuseeya u soo qori doont Garsooraha.

Ciddi dood ka qabto go’aanka Garsooraha gobolka wuxuu racfaan u soo qaadan karaan Garsooraha Somalia, kaas oo go’aankiis noqon doono mid kama dambeeys ah.

**Qod. 21**

Shahaadoyinka codbixiyeyaalka ku qoran bugga keydinta codbixiyeyaalku waa in si rasmi ah loogugu geeya guryahooda muddo 75 gudahooda laga bilaabo maalintii sida uu qabo qodobka 11 lagu faafiyey dekreetada Maamulaha Guud.

Shahaadadu waa in ay tilmaantaa, goobta, maalinta iyo saacadda uu codeynta dhici doonto. Codbixiyeyaalku waxay ka soo qaadan karan shahaadada xafiiska xatta haddii mudada sare la dhaafo.

**Qod. 22**

Militariga iyo kuwa militariga u qaabeysan waxay ka qeyb gelin karaan dorashooyinka dowladda hoose ee dalka haddii muddo hal sano ka badan ay ku sugnaayeen halkaas.

Laba bilood ka hor intii aanan la gaarin muddada doorashada, hoggamiye kasta ee militari iyo kuwa militari u qaabsan waxay soo gudbin doona liska military xaq u leh in ay codeeyaan.

## Cutubka 6aad

Codbixinta

**Qod. 23**

Goobaha dowladda hoose oo ay ku qoran yihiin codbixiyeyaal ka badan 200 codbixiye, waxaa badin karan goobaha doorashooyinka oo midkiiba ay ku codeyn karan dad aan ka badneyn ila 200 codbixiyeyaal.

Tirada goobaha codeynta waxaa qorsheyn doona madaxa dowladda hoose waxaana ansixi doono Xafiiska Arrimaha Gudaha.

**Qod. 24**

Codeyntu waxay ka dhici doonta goob ku haboon in codbixiyo uu ku gudan karo cod bixintiisa si sir ah.

Goobta codbixinta, waxaa soo geli doono codbixiyeyaalku mid mid iyagoo sita shahaadadooda codbixineed.

**Qod. 25**

Kaarka codeyntu waa in uu hal qaab yeeshaa oo laga hirgeliyey dalka gudahiisa oo dhan.

Kaarku waa in ay ku qoran yihiin godadkii musharaxiinta liiska

Dabacaadda iyo qeybinta kaararka codbixinta waxaa u xil saaran Xafiiska Arrimaha Gudaha.

Sanduuqa doorashu waa in hal qaab u suubsanaadan dalka oo idil, qeybintiisana waxaa u xil saaran Xafiiska Arrimaha Gudaha.

**Qod. 26**

Goobaha doorashooyinka waxay ka kooban yihiin qof guddomiye ah iyo 2 kormeere oo uu Garsooraha gobolka ka soo xulay codbixiyeyaalka aaga deggen, hal qof oo ah xoghaye iyo qof tarjume ah oo uu Garsooruhu ka soo qaatay xafiiska doorashooyinka.

Guddomiyaha iyo xoghayahu waxay noqon karaan dad aan ku qorneyn bugga keydinta codbixiyeyaalka.

Kormeerayaashu waa in laga soo xula dadka ay wakiiladaha liisaska codbixiyeyaalku kuwaasoo yaqaana sida wax loo aqriyo ama loo qoro.

**Qod. 27**

Goobaha doorashooyinka waxaa u dhexeyn doona xafiis dhexe oo ka koobnaan doona guddomiye iyo laba xubin oo Somali ah iyo hal qof oo xoghayn ah.

Waxaa kale oo ka tirsanaan doono xafiiska dhexe 2 qofood oo u qaabilsan tirinta iyo is barbar dhigga xisabaadka.

Xubnaha xafiiska dhexe waxaa soo magacaabi doono Garsooraha gobolka

Haddii hal goob oo doorasho ay jirto, xafiiska dhexe iyo goobta doorashoyinka waxay noqon doonaan hal qura.

**Qod. 28**

Banaan baxyada doorashooyinku waxay bilaaban doonaan 30 beri ka hor intii aysan dorashooyinku bilaabanin.

Waxaa ka reeban in wixii xayeeysiin ah ee doorashooyinka qaabilsan la horkeeno ilaa 200 oo mitir ee xafiiska doorashooyinka
Waxaa soo geli kara qolka doorashooyinka oo keliya ciddii wadato shahaadada codbixinta.

Looma oggola in hub ama agabka dagaal lala galo goobaha doorashooyinka. Guddomiyaha goobta doorashooyinka wuxuu u xil saaran yahay in uu ilaaliyo qolka codbixinta, wuxuu u yeeri kara saraakiisha booliska iyo kuwa qalabka sida si looga bixiyo ama xiro ciddii qalqal ku wado habsami u socodka arrimaha doorashooyinka. Cidamadaasi soo ma geli karan goobaha codbixinta haddii marka hore uu guddomiyuhu codsanin.

Guddomiyuhu wuxuu amri kara in laga saaro goobta codbixinta ciddii si iska yeel yeel ah la daahdo codeynta, ama diida in ay soo celiyo karaka codbixinta, kuwaaso loo ogolaan doono in markii ay doorashadu dhamaato ay mar kale ku soo noqday goobta si ay u dhameystiiran cod bixintooda.

Marxaladahaan sare ku xusan waan lagu qoran warbixiinta goobta codbixinta.

**Qod. 29**

Markii ay saacadu tahay 6 subaxnimo ee maalinta codbixinta, guddomiyaha arrimaha doorashooyinka wuxuu furi doona bashqadda xiran oo ay ku jiran shabadda xafiiska wuxuuna ku qori doona warbixinta goobta codbixinta.

Wuxuu kale oo furi doona bashqadda ay ku jiraan karaarka dadka codeyn doono oo ku qoran liiska codbixiyeyaalka wuxuuna ku keydin doona sanduuqa ay Xafiiska Arrimaha Gudaha ay u soo dhibtay maamulka dowladda hoose. Wixii karar dheerad ah wuxuu ku xafidi doona bashqadda.

**Qod. 30**

Waxaa codeyn karaa oo keliya ciddi ku qoran liiska codbixiyeyaalka. Liiska tirada codbixiyeeyalku iyo 4 nuqul ee liiska musharadka waa in lagu dhejiyaa qolka doorashooyinka si loo arko intii doorashooyinku ay socdaan.

**Qod. 31**

Guddomiyaha, kormeerayaashu, xoghayahu iyo tarjumuhu ee xafiiska doorashooyinka, iyo saraakiisha ciidanka booliska waxay iyaganu codbixin karaan kadib markii ay muujiyaan shahaadooyinka codbixinta, ee xafiiska ay ku leeyihiin in ka cod bixiyaan.

Ciddii codbixiye ah ee sare ku xusan, waxay ku qoran yihiin liiska xafiiska waxaan lagu qori doona warbixinta guud ee goobta.

Waxaa reeban in askartu ay iyagay hubeysan ay soo galaan goobaha doorashooyinka.

**Qod. 32**

Dadka indhaha la', kuwa ay gacmahu ka go'an yihiin, kuwa jirro awgeed u baahan in gacan la siiyo, waxaa loo ogol yahay xubno reerkooda ka tirsan ay gacan siiyaan ama, maqnaanshaha cod bixiye kale, oo si iskiisi ah loogu doortay wehel, waxaa muhim ah in mid ama ka kale laga diiwaangeliyay in laga doorto degmada.

Codbixiye uma shaqeyn karo inuu noqdo wehel wax kabadan hal qof oo curyaan ah. Ogeysiis gaar ah ayaa lagu sameeyaa shahaadadiisa doorashada, oo sameeya madaxa xafiiska.

Looma oggola in uu qofka takuleeynayaa dadkaasi sare ku xusan oo takuleeyo hal qof ka badan. Waxaana loo baahan yahay in shahaadada doorashada ay ku qoran tahay in uu fulin karo howlaha taakuleynta.

**Qod. 33**

Codbiye kasto wuxuu codbixin kara sida uu u soo kala horeyey.

Waa in ay muujiyaan qoraalka aqoonsi ah oo maamulka dowladdu soo saartay. Kaas oo qeybta aqoonsiga lagu qoray qoraalkaasi. Haddii aysan jirin qoraal aqoonsi oo u qalma, xubnaha ka tirsan xafiiska ayaa caddeyn doona codbiyahaasi isagoo saxiixi doono qeybta tilmaameysa aqonsigiisa.

Haddii cidna aan ka gareyneyn, codbixiyuhu wuxuu ka codsan karaa codbixiye laga yaqaano xafiiska si loo caddeyo aqoonsigiisa. GUddomiyuhu wuxuu uga digi doona codbixiyaha damiinta qaada in haddii oo been ka mara kaco uu muteysan doono ciqaab.

Codbixiyaaha ka marqaati kaca aqoonsiga waa in uu saxiixisa sara qeybta aqoonsiga.

Haddii u shaki galo aqoonsiga codbixiyaha waxaa kala saari doono guddomiyaha.

**Qod. 34**

Kadib markii la aqoonsado cod bixiyaha, wuxu Guddomiyuhu kala soo bixi doonaa sanduuqa karka doorashada , shabad ayuu saari doono isagoo u micneyey habka loo calaameyn doono, wuxuu u dhiibi doonaa ciddi codbixinta u taagneyd.

Xubin ka tirsan xafiiska doorashooyinka ayaa saxiix saari doono qeyta ku dhaw meesha uu saxiixay codbixiyaha.

Kaarka oo ay maqan tahay shabbadda lama gelin karo sanduuq coddeynta, ciddii wadatana ma codeyn karto. Kararkaasi waa in guddomiyaha ama 2 kormeereyaal ay hubiyaan oo kadib lag xiro warbixinta guud, kaas oo caddeynayo aan weli loo keeni.

Hal kaar wuxuu u dhigma hal cod ee liiska.

Waxaa reeban calaamooyin iyo tilmaamo ka duwan.

Haddii kaarku xumaado wuxuu codbixiyuhu weydisan kara mid kale isagoo soo celi doono kii xalaabay, guddomiyuhu wuxuu isku laalabi doona kaarkasi oo ku kor qori doona “kaar xumaaday” wuuna saxiisi doona.

Codbixintu waxay socon doonta ilaa iyo intii codbixiye kasto oo ka qeyb qaatay doorashada ilaa iyo sacada 20 waa in lagu xadir yahay xafiiska doorashooyinka.

**Qod. 35**

Guddomiyuhu karib markii uu tixgeliyey aragtida kormeerayaashu wuxuu ku dhawaaqi doona si ku meel gaar wixii ka soo baxay doorashooyinka.

Wixii muran ee ka dhashay intii codeyntu socota waxaa lagu go’aamin doona xafiiska doorashooyinka kadib markii la askriyey warbixinta guud kadibna waxaa loo gudbin doonaa Garsooraha gobolka.

Go’aanku wuxuu noqon doonaa mid tirada badan lagu go’amiyey.

## Cutubka 7aad

Go'aaminta

### Qod. 36

Kadib markii ay codeyntu dhammato, guddomiyuhu wuxuu miska ka nadiifin doonaa wixii qoraal ah:

1) Ku dhawaaqi doono in howlihi codeyntu dhammadeen;

2) Wuxuu caddeynaya tirada dad coddeyey ee liiska cod bixiyeeyaalka ku qornaa iyo tirada shahaadoyinki oo ay wateen. Liis kasto waa in uu guddomiyaha iyo 2 kormeerey ay saxiixeen;

Waxaa kadib lagu dhaqaaqi doona howlahaan:

— In laga soo bixi sanduuqa codeynta hal kaar markiiba;

— In lagu qoro tilmaam liiks mushariinta codka ciddii la siiyey kadibna uu hal kormeere saxiixo. Kormeeruhu waa in uu ka guddomaa guddomiyaha kaarka lagu codeeyey, intii uusan u gudbinin kormeeraha kale wuxuu cod dheere ku dhawaaqi doono cidda codkaasi la siiyey. Kaarkaasi waxaa si toos ah la gelin doona khaanada oo si wada siman horay loogu qeybiyey dalka gudahiisa oo dhan.

Haddii kaarka lagu codeeyey loo garto in uu yahay mid halaabay waxaa la gelin doonaa bashqad maro ka sameeysan oo xafiiska laga bixiyey. Sidoo kale bashqad maro ka suubsan ayaa la gelin doonaa kaarka codeynta oo muran ka dhasho.

Wuxuu guddomiyuhu ku dhawaaqi doona in kaar codeyn uu yahay min aan la qaadan Karin isagoo ay la jiraan laba kormeere haddii:

— Kaarkuu uusan wadanin shaabad amase uusan ahayn kii loogu tala galay;

— Haddii si qalad ah wax kale lagu qoray;

— Haddii aysan jirin ciddi loo codeeyey ama la garan la'ayahay cidda liiska ku qoran oo codka la siiyey.

Haddii isqilaaf yimaado in kaar codeyn uu yahay mid aan wax ka soo qaad lahayn, kaarkaasi wuxuu noqonayaa mid muran ka taagan yahay waxaana u xilsaaraan in Garsooraha gobolku uu ka gaaro go'aan, kaas oo noqon doono mid kama dambeys ah.

Kaarku wuxuu noqon doona kadib markii mid ka mid xubnaha xafiiska doorashooyinka uu qabo aragtii ka duwan dadka kale.

Tirista kaarka waa in ay dhacda isla maalinta ay doorashooyinku dhaceen. Haddii ay sii socoto ilaa maalinta ku xigto xafiiska doorashooyinka waxaa lagu qufuli doona astamaha maaliyaha xafiiska doorashada ayaa diyaarin doona shaambadaha lagu dhejiyo daaqadaha iyo albaabada fasalka, halkaas oo alaabta lagu kaydinayaa si fiican loogu xiray.

Kadib markii ay tirista kaararka codbixinta ay dhamaato guddomiyuhu:

— Wuxuu tiri doona kaararka codbixinta ee saxa ah, kuwa qalad ah iyo kuwa muranka ka taagan iyadoo laga doonayo in ay islahaadan tirada codbixiyeyaalka codeyey ee ku qornaa liiska codbixiyeyaalka;

— Wuxuu hubsanaya dibna u caddeynayaa tirada guud ee codadka saxda ahaa ee liis kasta.

Guddomiyuhu wuxuu qori doona warbixin 3 nuqul ah oo ku saabsan habka ay howlaha u dhaceen, wuxuu si toos ah isagoo wato 2dii kormeere u geyn doona nuqulka rasmiga ah ee warbixinta iyo bashqadiihi kaararka sax ah, kuwii qaldamay iyo kuwii muranka ka taagnay xafiiska dhexe ee doorashooyinka ee dowladda hoose kuwaaso qayixi doono:

a) — Tirada guud ee codadka saxda ah;

b) — Xisaabinta tirada codbixiyeyaalka ku soo aaday tirada la taliyeeyaasha tartamaayey in la doorto;

c) — In loo qeybiyo kuraasta ciddii heshay iyadoo lagu farisiyey xisaabta sida faqradda sare ku qoran ee tirada cod bixinta. Haddii kadib markii la qeybiyey kuraasto ay kuraas dheerad ah soo haraan waxaa la sii doona kuwaa aan soo gaarin heerka laga doonay xisaab ahaan. Haddii ay bar bar dhac jiro waxaa lagu kala bixi doona qori tuur.

Waxaa loo dooran doona la taliye dadkii liiska ku jiray laga bilaabo midka ugu horeyey ilaa iyo mid ay tirada kuraasto hantiyey.

Howlahas markii la soo gebogebeeyo howlahaasi, guddomiyaha xafiiska dhexe ee doorashooyinka wuxuu qori doona warbixin oo ka kooban 3 nuqul.

Hal nuqul iyo lifaaqyadooda oo dhameestiran waxaa loo diri doona garsooraha gobolka, nuqul waxaa iska leh madaxa maamulka dowladda hoose midna waxaa iska Xafiiska Arrimaha Gudaha.

Kursigii banaanado sabab kasto awgeed waxaa yeelan doono cidii ku xiga qofka ugu dambeyey ee helay kursi.

Ku dhawaaqi natiijooyinka waxaa yeelan doono garsooraha gobolka amad garsoore laga soo diray Maxkamadda Somaliya, kadib markii la xaliyo natijada kaarka codbixinta ee murankaka taagnaa.

**Qod. 37**

Guddiyada la taliyeyaasha sidaas lagu soo doortay waxay jiri doonaan ilaa iyo 3 sano.

## Cutubka 8aad

Amarrada Ciqaabta ah

**Qod. 38**

Ciddi diida, sabab la’aan in ay qaado xilalka xafiiska doorashooyinka, ama si xoog sheegato ah ku soo galo goobta doorashooyin, ciddi kicisa been abuur ama isku soo qora liiska musharaxiinta wuxuu muteysan doonaa xarig ilaa 3 bilood ama ganax ilaa iyo So 300.

**Qod. 39**

Ciddii la soo gasha goobta doorashooyinka hub ama diida in uu galo qolka doorashoyinka, wuxuu muteysan doona xarig ilaa 6 bilood ama ganax ilaa iyo So 600.

**Qod. 40**

Ciddii qalqal geliso habsama u socodka codbixinta, ama hor istaaga qaabka bandhiyada doorashooyinka ama si kasta ha noqotee is bedel ku suujiya naatijada doorashooyinka wuxuu muteysan doona xarig ilaa 2 sano ama ganax ilaa So 2,400.

**Qod. 41**

Xukunka la xiriira dembiyada laga gala doorashada wuxuu ka horistaagi doona in uu qofkaasi ka lumo xaqiisa dorasho iyo in la doorto ilaa muddo 3 sano ah.

**Qod. 42**

Xukunka la xiriira dembiyada sare ku xusan waa mid toos ah.

## Cutubka 9aad

Shurucda la Buriyey

### Qod. 43

Kadib markii la hirgeliyey doorashooyinka dowladaha hoose sida ku qoran amar-sharcigaan, waxaa amaradda lamb 9 iyo 10 ee 6 Juun 1951 la buriy, ama wax laga bedelay ama la dhex geliyey sida halkaan ku qoran:

— Qod. 1 ee amarka lamb 9 waxaa lagu kordhiyey "Guddomiyaha waa taakuleyn doonta guddi oo lagu dooran doono sida ku qoran amarka lamb. 18 ee 20 Disember 1953';

— Qod. 2, 3, iyo 4 ee ku qoran amarka lamb 9 waa la buriyey;

— Dhamaadka qod 2 ee ku qoran amarka lamb 10 waxaa lagu kordhiyey " lagu dortay sida ku cad amarka lamb 18 ee 20 Disember 1953";

— Qoc. 4 ee ku qoran amarka lamb 10 waxaa la buriyey amarka " waxaa la qayaxay tirada xubnaha guddiga dowladda hoose";

— Qod. 3.5 iyo 6 ee amarka sare ku xusan waa la buriryey.

## Cutubka 10aad

Amarrada kama Dambeysta ah iyo kuwa ku meel Gaarka ah

### Qod. 44

Markii ugu horreysay ee la dhaqan geliyo amarkan, labadaba marka laga hadlayo xuquuqda wax doorashada iyo u-qalmitaanka doorashada, ee lagu xusay qodobbadii hore 5, 7 iyo 22, iyadoon loo eegin shuruudaha muddada deggenaanshaha degmada.

Kabid arrimaha kale ee laga doonayo si qof loo doorto ama uu qof doorto, waxaa loo baahan yahay in qofku ku qoran yahay xafiiska dhalashada ee dowladda hoose iyo tirakooba lagu amray lamb 17 ee 30 Oktober 1952.

### Qod. 45

Waxaa iska leh Maamulaha Guud in uu qoondeeyo waqtiga la hirgelin doono amaradda ku qoran halkaan.

### Qod. 46

Amarkaani wuxuu hirgeli doona taarikhda la qoro Faafinta Rasmiga ah ee Somaliya

Muqdisho, 20 Disember 1953.

Maamulaha Guud

**F. Martino**